

Kusoo Dhawow Capitol Region Watershed District

Baadh goobteena si aad u baratid sida aan u qabanayno ee aan u nadiifineyno biyaha roobka si loo ilaaliyo harooyinka iyo Wabiga Mississippi.

Marka roobku da'o ama barafku ku dhalaalo magaalo, biyuhu waxay dul sabeeyaan meelaha adag sida wadooyinka, dhinacyada wadada, iyo saqafyada, iyo nidaamka biyo mareenka.

Halkaas laga bilaabo, biyaha waxa si degdega loogu qaadaa harooyinka ugu dhow iyo Wabiga Mississippi iyagoon la daaweyn.

Shaykasta oo wadada yaal, sida xashiishka, milixda, ama caleemaha dhirta, wuxuu ku danbeyanayaa biyaheena.

Waxaanu ka caawinaa dhisida mashaariic lagu yareynaayo oo lagu qabanaayo biyaha kahor intaanay gaadhin beebabka duufaanta.

Waxa jira beero roob, nidaamka dib u isticmaalka biyaha roobka, hareeraha wadada ee leh biro mareenka, moosaska dhirta, iyo beebabka dhulka hoostiisa si loo qabto loona nadiifiyo dhibic kasta oo biyaha kusoo dhaca hantideena ah.


Ma ka raadinaysaa astaamaha dhammaan goobaheena si aad waxbadan ga ogaatid.

Kawada Shaqeynta Biyo Nadiifa

Waxaanu nahay laan dawladeed oo maxali ah lana shaqeysa haayado badan oo shuraako ah iyo dadka sidaada oo kale ah si aan u ilaalino, maareyno, oo u horumarino harooyinkeena, durduradeena, wabiyadeena, iyo biyo mareenadeena.

Degmadeenu waxay gaadhaa 40 jibaar mayl waxaana ka mida ah qeybaha Saint Paul, Roseville, Falcon Heights, Lauderdale, iyo Maplewood.

Booqo mid ka mida shanteena haro: Como, Loeb, Crosby, iyo Little Crosby ee Saint Paul, iyo McCarrons ee Roseville.



Waxaad ka qeyb noqon kartaa ilaalinta biyaha adoo:


- Qaadaa xashiishka
- Beeraya beerta roobka
- Ka xadhaya caleemaha dhirta wadada
- Isticmaalaya milix kooban xagaaga
- Nadiifinaya kadib xayawaanka rabaayada ah

Roobka oo Il ah

Biyaha roobka waxa laga qabsadaa saqafka guriga, waxa lagu kaydiyaa 3,000-galaan caag dhismaha ah (laga arki karo dhanka daaqaadaada bidix), la nadiifiyey, laguna isticmaalay goobta.

Caaga waxa lagu xidhay sadaasha cimilada oo wuxuu ku faaruqaa beerta roobka ee ka danbeysay dhismaha kahor intaan duufaana iman.

Tani waxay u saamaxaysaa in la ururiyo oo dib loo isticmaalo biyo badan oo roobka iyadoo la nafaqeynaayo beeraha.



Safarka Dhibicda-Roobka

Qabashada biyuhu waxay muujinaysaa sida biyaha roobku uga baxaan magaalada uguna qulqulaan beebka duufaanta ama dib loogu celiyo dhirta si dhulku u nuugo.

Taabo BILOW oo go'aanso ikhtiyaarka aad u maleynaysid inuu ilaalinayo harooyinkeena iyo Wabiga Mississippi.

Biyaha Nadiiftaee Duur-joogta

Booqo Little Free Library® wixii faahfaahin kaadha ciyaarta Sahaminta Biyaha Duur-joogta.

Raac fikradaha lagu raadinayo xayawaanka ku hareeraysan goobteena.

SCAN FOR MORE INFORMATION



Escanea el código para más información
Yog xav paub ntixiv mus yees lub cim
Lambarka halkan mari si aad u aragto faahfaahin
မေးခွန်း (မေးခွန်း) အသေးစားနည်းတူအတိုအကျအတိုအကျ

